



Ku soo dhowoow Vuxenskolan !

Waxaanu kula doonaynaa inaad si wanaagsan ula bilowdid wadanka Sweden, sidaas darteed waxaanu leenahay shaqaale leh waayo aragnimo balaaran iyo xirfad hagitaan oo baahsan iyadoo qaar badan oo naga mid ahi asal ahaan ka soo jeedaan dalal kale kuna hadlaan luuqadaada. Waxaanu leenahay waayaragnimo wanaagsan oo la xidhiidha imaanshaha wadanka Sweden oo fiicnayn karta fahamka xaaladaada oo ku caawinaysa waqtiga kuugu horeeya wadankaaga cusub. Shaqaalahayagu aad bay u darban yihiin, Hage kuu gaara ayaa ku siin doona caawimo la xidhiidha baahiyahaaga. Waxaanu u taaganahay caawimadaada markaad noo baahan tahay.

Qaar badan oo naga mid ahi waxay ku hadlaan luuqado dhawr ah, waxaanu u aragnaa inay luuqad maalmeedku qayb muhiim ah ka tahay xaaladaha bulshada. Sidaa daraadeed aqoon luuqadeedkan waxaanu u isticmaalaa xaaladaha qaar si ay u fududeeyaan fahamkaaga iyo horukaca qof ahaaneed. Luuqadaha aanu ku hadalaa waxa kala yihiin: af Soomaali, beershiyaanka, carabiga, kurdiga, turkiga, serbokoroshiyaanka, boosniyaanka, ingiriisiga, faransiiska, jarmalka, ruushka iyo af iswidhiska. Waxaanu kaaga sheekayn oo ku bari doona habladhaqanka bulshada sweden, saylada shaqada iyo fursadahaaga waxbarasho. Hagaha gaarka kuu ahi wuxuu xiriir shabakadeed balaadhan la leeyahay shirkadaha iyo ururada laamahooda intooda badan. Kuwaasoo inta badan weliba dalbada/ku xidha waxbarasho iyo waayo aragnimo ku haboon helitaanka shaqada.

Vuxenskolan wuxuu ku yaal Redbergsplatsen magaalada Göteborg. Way fududahay inaad noo soo raacdo Bas iyo Tareenada magaalada ka dhex shaqeeya. Meesha ugu dhow ee laga raacaana waxay noo jirtaa 100 mitir oo keliya. Waxaanu leenahay qolaal wanaagsan oo nuuraya, iyo qol loogu talo galay Ehlu diinka iyo caabudka tukanaya. Waxaa kale oo aanu leenahay makhaayad aad ka iibsan karto cunto iyo cabitaan.

Hadaad u baatan tahay faahfaahin dheeraada telefoonka kula xidhiidh:
Hasse, 0707-80 18 28 ama E-malkiisa hasse.astren@vuxenskolan.se